IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية　　　　　　　　　　　　　　الجريدة

Sannadka 14aad　Muqdisho, 1da Sebtember 1986　L. 9

## JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA　　　　　　　　نشرة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar walba — **RUKUNKA**: Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda - dibaddeedana waa **Shs. 300. Rubunka la weydiisto** waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoraalka ku F. R. halkii **sadar iyo waxii ka yar waa 2** laba Sh. Rukunka iyo qoraalada **waxaa** la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah **Lacagta waxaa** lagu bixinayaa Kafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda **Lacagta.**

### KOOBNAANTA

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI


SHARCI L. 25 ee 6 Agoosto 1986, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ee Horumarinta. . Bog; 638

SHARCI L. 26 ee 6 Agoosto 1986, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga oo maamulaysa Tashiilaadka gaarka ah ee Sub-saxaraha Afrika. » 639


### QAYBTA LABAAD

### XEER


XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 25 ee 14 Agoosto 1986, Dhismaha Xafiisyada Gobollada ee Wasaaradda Qorsheyn-

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 26 ee 11 Agoosto 1986, Billad Dahab Waddaninimo ah oo lagu Maamuusay Ciidanka Guuiwadeyaasha Ummadda. » 642

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.85, Naado Dhul J.le C/laahi Maxamed Axmed L. 574 » 643

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.85, Naado Dhul J.le Maxamed Caseer iyo Mux/din L.575 » 644

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.85, Naado Dhul J.le Nuur Maxamed Nuur L. 576 » 645

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.85, Naado Dhul J.le Barqad C/laahi Xande L. 577 » 646

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.85, Naado Dhul J.le Xasan Xalane Xasan L. 578 » 647

DAWLADDA HOOSE MUQ. 24.1.85, Bed. Naado Dhul J.le Bedel Xirsi Faarax L. 579 » 648

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.85, Naado Dhul J.le Cilaamo Xasan Maxamed L.580 » 649

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 17/7/86, Lumid Jeeg War. L. 0176186 ku qoran Shugri Xaaji Ciise L. 581 » 650

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.8.86, Lumid Jeeg War. L. 0276486 ku qoran Saciid Cismaan Maxamed L. 582 » 651

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 11.8.86, Lumid Jeeg War. L. 0289794 ku qoran Cali Maxamed Samatar L. 583 » 652

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 1.3.86, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Yuusuf Xasan Axmed L. 584 » 653

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 13.7.86, Lumid Jeeg War. L. 0229400 ku qoran Maxamuud Xuseen Maxamed L. 585 » 654

MAXKAMADDA GOB/DEGMADA BERBESA, 2.8.86, Lumid Jeeg War. L. 0151276 ku qoran Cusmaan Maxamed Barkhadle L. 586 » 655

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 25.8.86, Lumid 2ba Jeeg War. L. 158555-144184, ku qoran Ciise Kaahin iyo Daa'uud Xaaji Axmed L. 587 » 656

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.8.86, Lumid Jeeg War. Lr. 662700 ku qoran Heybe Xuseen Xersi L. 588 » 658

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.8.86, Lumid Jeeg War. Lr. 662704 ku qoran Heybe Xuseen Xersi L. 589 » 659

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.8.86, Lumid Jeeg War. Lr. 141891 ku qoran Heybe Xuseen Xersi L. 590 » 660

## S A X I D — Q A L A D

FAAFINTA RASMIGA AH ee Lamb. yahay 1 r 10 ee 17 Oktoober 1985, Bog. 763 ku qoran go'aanka Maxkamadda Gobolka Togdheer, Jeegga Wareega ee lamb. yahay 023126 ku qoran J.le Cali Saciid Axmed, waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran:-

Jeeg Wareega lamb. A 0231026.-

# QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

Sharci lambar 25 ee 6da Agoosto 1986: Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ee Horumarinta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ee Horumarinta, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan Sh.So. 28.700.000 (labaataniyosiddeed-malyan-toddobaqoql-kun) oo loogu talo galay Barnaamijka Habeynta Qaybaha Beeraha.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Washinton D.C. marka ay taarikhdu ahayd 24 Juunyo 1986.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

### Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayo Heshiiska ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxay Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya ku yeelanayaan astaan sharci ah waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

### Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

### Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6.8.1986

MADAXWEYNAHA JDS

Sharci lambar 26 ee 6da Agoosto 1986: Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga oo maamuleysa Tashiilaadka gaarka ah ee Sub-saxaraha Afrika.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga oo maamuleysa Tashiilaadka gaarka ah ee Sub-saxaraha Afrika, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan SDR 26.400.000 (lixiyo labaatanmalyan-afarboqolkun) oo loogu talo galay barnaamijka habeynta qaybta beeraha.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Washinton D.C. marka ay taariikhdu ahayd 24 Juunyo 1986.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayo Heshiiska ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxay Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya ku yeelanayaan astaan sharci ah waxaana dhaqangelintooda la waafaqinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6.8.1986

MADAXWEYNAHA JDS

# QAYBTA LABAAD

## X E E R

Xeerka Madaxweynaha JDS, lambar 25 ee 14 Agoosto 1986: Dhismaha Xafiisyada Gobollada ee Wasaaradda Qorsheynta iyo Istaatiistikada.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobbada 82 iyo 88, faqradda 2aad, ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan Wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 3dii Juun 1962 iyo beddelaadyadii ka dambeeyey, kuna saabsan Nidaamka Dawladda;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in Wasaaradda Qorsheynta iyo Istaatiistikadu ay Gobollada ku yeelato Xafiisyo;

MARKUU TIXGELIYEY: Soojeedinta Wasiirka Qorsheynta iyo Istaatiistikada;

DHEGEYSTAYNA: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

### Qod. 1aad

Waxaa la dhisay Xafiisyada Gobollada ee Wasaaradda Qorsheynta iyo Istaatiistikada.

### Qod. 2aad

Xafiiska Gobolka ee Wasaaradda Qorsheynta iyo Istaatiistikadu wuxuu qabanayaa hawlaha soo socda:

1. Ururinta iyo iskuduwidda xogta dhaqaale iyo bulsho ee Gobollada iyo Degmooyinka;
2. Dabagalka kontoroolka iyo qiimeynta fulinta mashaariicda horumarinta ee ka socda Gobolka iyo Degmooyinkiisa;
3. Tilmaamidda ilaha dhaqaale iyo bulsho ee Gobolka iyo Degmooyinkiisa ee maalgelinta ku habboon iyo kala mudnaantooda;

4. Baaridda xaaladda dhaqan dhaqaale iyo kheyraadka Gobollada iyo Degmooyinkiisa;

5. Diyaarinta barnaamijka horumarinta Gobolka iyo Degmooyinkiisa;

6. Ka warbixinta heerka fulinta mashaariicda horumarinta ee Gobolka iyo Degmooyinkiisa iyo talo ka soo jeedinta toosintooda.

Qod. 3aad

Xafiiska Wasaaradda Qorsheynta iyo Istaatiistikada ee Gobolku wuxuu yeelanayaa Isuduwe Gobol. Isuduwaha waxaa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta iyo Istaatiistikada, isagoo dhegeystay soojeedinta Agaasinka Istaatiistikada.

Qod. 4aad

Isuduwuhu wuxuu xubin ka noqonayaa Golaha Horumrainta Gobolka. Wuxuu la xiriirayaa Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Gobolka oo uu ka qaadanayo awaamirta shaqo maalmeedka ee Gobolka. Hase yeeshee wuxuu masuul uga yahay Wasaaradda Qorsheynta iyo Istaatiistikada xogta istaatiistikada oo saldhigga u ah dejinta barnaamijyada horumarinta Gobolka iyo Degmooyinkiisa.

Qod. 5aad

Isuduwaha Wasaaradda Qorsheynta iyo Istaatiistikada ee Gobolku wuxuu yeelanayaa xuquuqda iyo gunnooyinka ee Isuduwayaasha Wasaaradaha kale ee heer Gobol.

Qod. 6aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 14 Aug. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS, L. 26 ee 11 Agoosto 1986: Billad Dahab Waddanimmo ah oo lagu Maamuusay Ciidanka Guulwadeyaasha Ummadda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo Warbixinta Taliyaha Ciidanka Guulwadeyaasha;

MARKUU TIXGELIYEY: Doorka lama ilaawaanka ah ee uu ka soo qaatay hirgelinta ujeeddooyinka Kacaanka, iyo halgankii taxanaha ahaa oo uu soo maray Ciidanka Guulwadeyaasha, tixgeliyeyna sida uu goor walba heeganka ugu yahay habsami u fulinta hawlaha difaaca, tababarrada, taakuleynta iyo hawlgalka joogtada ah uu kala qayb galay Xisbi iyo Dawladba;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagamamaarmaan tahay in Hay'adda ku shaqeysay Niyad Sami, Waddaninimo, Kacaanimo iyo iyadoo si hagar la'aanta u soo gutay waajibaadkoodii, la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudanyihiin Ummaddooda loogana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY

QODOBKA KELIYA

Xeerka soo socda:

Waxaa lagu maamuusay BILLAD DAHAB WADDANINIMO AH Ciidanka Guulwadeyaasha Ummadda.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo

Muqdisho, 11 Agoosto 1986

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cilaamo Xasan Maxamed ay u soo qoratay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalint iitaariikhdu ahayd 12.1.85 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Shibis Waddada —— qaabkiisu yahay Quadaraato addimihiisuna yihiin 11,5X12 kuna fadhiya mq. 138.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 574

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdullaahi Maxamed Axmed, Canab Maxamed ay u so qorteen arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 3.1.85 ay ku weydiisteen gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-Shiid Waddada ——— qaabkiisu yahay Retangolare addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya mq. 600

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 491

Koofur waxaa ka xiga: Waddada Ciidammada Q.S.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 490

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 494

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Gen. 1985

GAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 575

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Caseer, Muxuddjin Xasan Caji ay u soo qorteen arji Waaxda Dhujka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 19.12.84 ay ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Waddada ——— qaabkiisu yahay Retangolare addimi-hiisuna yihiin (140X94) + (115X70) 52X(115 ÷ 112,70) X98 kuna fadhiya mq. 29.617,30.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Goof dad

Koofur waxaa ka xiga: Jid

Galbeed waxaa ka xiga: Good dad

Bari waxaa ka xiga: Goof dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo yaal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doon karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 576

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Nuur Maxamed Nuur uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 2.1.85 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Boondheere Waddada ——— qaabkiisu yahay Afar Gees isl. addimihiisuna yihiin 13X13 kuna fadhiya 169.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/H. Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 19 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 577

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Barqad Cabdullaahi Xande uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 20.12.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodan Waddada —— qaabkiisu yahay Afar Gees isl. addimihiisuna yihiin 13X13 kuna fadhiya 169.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 797

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada 26ka Juun.

Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga biiaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 578

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xasan Xalane Xasan uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 21.12.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Hodan Waddada —— qaabkiisu yahay Afar gees isl. addimihiisuna yihiin 33X33 kuna fadhiya mq. 1089.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Joem. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 579

DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

UJEEDDO:- BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii ay soo weydiisteen Jaallayaasha la kala yiraahdo Bedel Xirsi Faarax iyo Axmed Cab/salaan Calim, maalintii taariikhdu ahayd 20.4.82 loona oggolaaday dhul ku yaalla Muqdisho Degmada Hodan soona Baar Xaraf-Waddada isku xirta Xamar-Afgooye, Qaabkiisu ahaa Rettangolar addimihiisuna ahaayeen 100X100 kuna fadhiya 10.000/=.

Waxaa la caddeynayaa in qalad ahaan u dhacay qoritaanka cadadka kor ku qoran in dhulka asaga ah qaabkiisu waa laba qaybood oo afar gees ah addimihiisuna waa (100X100) + (100X100) kuna fadhiya mq. 20.000/=.

Muqdisho, 24.1.85

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA
(Maxamed Cabdi Cusmaan)

L. 580

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT/69/86 BURCO 17.7.86

UJ; Baafin Jeegga W. ee Lam. 0176186

HADDUU ARKAY: Codsiga ay soo qoratay Shugri X. Ciise Cali ee ku saabsan in loo Baafiyo Jeegga Wareega ee Lam. 0176186 ee ka lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco ee Tr. tahay 16.7.86;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65, Lumid Jeegga Wareega ee Lumay Lma. 0176186 kuna qoran Cabdi Maxamed Aadan kana lumay Shugri X. Ciise Cali kuna jirtay Sh. So. 50,000/ lagana sameeyey L. Burco Tr. 23.7.1986.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan J.le Shugri X. Ciise Cali markii ay ka soo wareegto 20 casho gudahood laguna Shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA COSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayndoono gacanta laga saaro J.le Shugri X. Ciise Cali iyadoo la sugaayo muddada kor ku xusan.

GUDDOOMIYAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO
(Dr. Abuukar Islawaw Cumar)

KAALIYAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO
(Jaamac Cabdillaahi Bile)

L. 581

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Saciid Cismaan Maxamed;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu lumay Jeeg Wareeg. Lr. 0276486 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Kismaayo kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Muuse Cabdi Samatar sida ku cad warqadda Lam. 8738 Tr. 27.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Kismaayo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr.2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lr. 0276486 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Muuse Cabdi Samatar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo in ay siiso J.le Saciid Cismaan Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeegga War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto mudo aan ka yareyn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horrey sa aan wax ishortaag ah la keenin.

Muqdisho, 27.8.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 582

MAXKAMADDA G/TOGDHEER

MGT/100/86 Tr. 11.8.86

UJEEDDO: Baafin Jeegga War. ee Lam. yahay 0289794 ee ay ku qorayd lacag dhan Sh.So. 32,000/=;

GARSOORAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin J/W/-ee Lam. yahay 0289794;

MARKUU ARKAY: Ogaysniita Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco;

MARKUU ARKAY: Qod. 69,65, (Lumid Jeegga War. ee Lam. Ujeedada sare ku xusan yahay, ee ku qoran J.le Cali Maxamed Samatar, lagana sameeyey Laanta Burco, kana lumay Milge Ducaale Xasan, Tr. la sameeyeyna tahay 3.7.86.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeggaas kor ku xusan J.le Cali Maxamed Samatar, markii ay ka soo wareegto 20 casho gudahood laguna sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J.le Milgo Ducaale Xasan, iyadoo la sugayo muddada Baafinta ee kor ku xusan.

GARSOORAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO
(Maxamed Xaaji Cabduiqaadir)

KAALIYAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO
(Xuseen Xasan Sugule)

L. 583

MAXKAMADDA GOBOLKA W/G. HARGEYSA

MGH/10/86 Taariikhda 1.3.1986

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Yusur Xasan Axmed, ee Taariikhdiisu tahay 20.1.86, ayna ku codsanayso Cusboonaysiinta Saddexda Jeeg Wareega ee hoos ku qoran oo ka lumay in loo Cusboonaysiiyo;

MARKUU ARKAY: Taararka Bangigu qoray ee ku Taariikheysan 12.12.85, eeLaamaha Bangiga iyo Xisaabaha Guud uu u kalaqoray;

MARKUU ARKAY: Xaashida Lambarkeedu yahay 0264 ee Taariikhdeedu tahay 1.3.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, ayna ku caddeeyeen:-

1) Jeegga Wareega Lambar yahay 0204755 ee Taariikhdiisu tahay 25.10.85 ee Lacagtiisu tahay 50,000/= Sh.So. ku qoran Xasan Aadan Shire laga sameeyey Bangiga Laanta Hargeysa.
2) Jeegga Wareega Lambar yahay 0187595 ee Taariikhdiisu tahay 14.9.85 ee Lacagtiisu tahay 50,000/= Sh.So. ku qoran Cabdi C/llaahi Maxamed, laga sameeyey Bangiga Laanta Hargeysa. Iyo

3) Jeegga Wareega Lambar yahay 242526 ee Lacagtiisu tahay 20,000/=Sh.So. Taariikhdiisu tahay 1.12.85 laga sameeyey Bangiga Laanta Gabilay, kuna qoran Nuux Askar Caateeye;

MARKUU ARKAY:Yusur Xasan Axmed, in ay iska jeedahay Saddexda Jeeg Wareega ee lumay lacagtooda.

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gaeeryo Saddexda Jeeg ee Lumay ee Lambarradoodu kala yihiin (1) 0204755 (2) 0187595 (3) 242526, loona cusboonaysiiyo Yuusuf Xasan Axmed, cusboonaysiintana gacanta laga saaro iyada ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta laga soo saaro.

## WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed Laanta Hargeysa in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdjhiisa, si ciddii haysata Saddexda Jeeg Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay cabasho uga soo qortaan haddii ay dani ka hayso.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. W/G. HARGEYSA
(Ibraahin Faarax Maxamed)

L. 584

MAXKAMADDA GOBOLKA W/G. HARGEYSA

TIRSI, MGH/18/86 Taariikhda 13.7.86

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamuud Xuseen Maxamed kuna taariikhaysan 8.7.86, uuna kn codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee hoos ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamihiisa u kala diray ee ku taariikhaysan 1.6.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida Lambarkeedu yahay0686 ee Taariikhdeedu tahay 10.7.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kayda Soomaaliyeed Laanta Kowaad Hargeysa, ayna ku caddeeyeen in Jeeggaas Wareega Lambarkiisu yahay 0229400 ee Taariikhdiisu tahay 4.5.86, ee Lacagtiisu dhan tahay 50,000/= Shilin kuna qoran yahay Maxamuud Xuseen Maxamed, lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kowaad Hargeysa;

MARKUU ARKAY: In Jeegga kor ku qoran lacagtiisa uu iska leeyahay Maxamuud Xuseen Maxamed;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69.70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay ee Lambarkiisu yahay 0229400, loona cusboonaysiiyo Maxamuud Xuseen Maxamed, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata Maxamuud Xuseen Maxamed, muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu sooro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegga Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. W/G. HARGEYSA

(Ibraahin Faarax Maxamed)

MAXKAMADDA GOB/DEGMADA BERBERA

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob/Degmada Berbera.

HADDUU ARKAY: Arjiga Dacwadda ee uu soo qortay J.le Cusmaan Maxamed Barkhadle uuna ku codsanayey in loo caddeeyo Jeeggaasi ka lumay ee hoos ku qoran;

MARKU UARKAY: Taarka Baafinta ah ee la qoray 19.7.86 kana soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laan ta Berbera, lagana Baafiyey Qaybaha kala duwan ee Bangiyada lumista Jeeggaasi;

MARKUU ARKAY: Qod. L.9.5.69, L.2 waxaa caddaatay in Jeeggaasi Wareega Lr. 0151276, lana qoray 4.1.86, kuna qoran lacag dhan Sh.So. 25,000/= uuna lumay 4.1.86 Jeeggaasi ku qoran J.le Cusmaan Maxamed Barkhadle.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo marlabaad Jeeggaasi kor ku qoran muddo 15 Beri gudahood ah, ka dib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo mar kale Jeeggaasi kor ku qoran muddo 15 beri gudahood ah ka dib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, haddaan lahayn qof kale oo sheegata waxaa gacanta laga saarayaa ninka layiraahdo Cusmaan Maxamed Barkhadle, oo uu ka lumay Jeeggaasi ama qof ka sita awood Sharci ah. 15 beri waa in la sugaa.

Berbera, 2.8.1986

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB/DEGMADA BERBERA
(Dr. Shawqi Cilmi Cali)

KAALIYAHA MAX. GOB/DEGMADA BERBERA
(Sahal Dayax Weerar)

L. 586

MAXKAMADDA G. W/G. D. HARGEYSA

Taariikh 25.8.86

MGH/25/86

UJEEDDO: Baafin Laba Jeeg War.

1) J. W. No. 158555 ee 6.8.86 Lacagtiisu tahay 100.000/
kuna qornaa Cuse Kaahin Warsame lagana sameeyey Laan-
ta 1aad ee Hargeysa;

2) J.W. No. 144164 ee 16.7.86 Lacagtiisuna tahay 100.000
kuna qornaa Daa'uud Xaaji Axmed Caraale lagana samee-
yey Laanta 2aad ee Hargeysa.

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Cibaado Ma-
xamed Nuur oo ku taariikhaysan 23.8.86 ee ay ku codsanay-
so in loo cusboonaysiiyo Labada Jeeg Wareega ee Lumay ee
kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Laamihiisa iyo Xi-
saabaha Guud u kala diray ee 12.8.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida Lambarkeedu yahay 0842
ee Taariikhdeedu tahay 23.8.86; kana soo boxday Bangiga Ga
nacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa; kuna
caddeeyeen in Jeegagga Wareega ee Lambarradooda iyo La-
cagtooda iyo Taariikhdoodu iyo ciddii loo kala sameeyey ay
kor ku qoran yihiin;

MARKUU ARKAY: In Jeegaggaasi Wareega ee lumay
ay Lacagtooda iska leedahay Cibaado Maxamed Nuur;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo
baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegagga Wareega ee lumay ee Lambarradoodu kor ku sheegan yihiin in la kansal gareeyo; loona cusboonaysiiyo Cibaado Maxamed Nuur; cusboonaysiintana gacanta laga saaro iyada ama cid awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa siciddii haysata Jeegagga Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. W/G. HARGEYSA
(Ibraahin Faarax Maxamed)

L. 587

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Heybe Xuseen Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 662700 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xudur, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Cumar Yaasiin sida ku cad warqadda Lam. 8726 Tr. 27.8.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xudur;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lambar 662700 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xudur kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Cumar Yaasiin;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xudur in ay siiso J.le Heybe Xuseen Xersi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wa xishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.8.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 588

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Heybe Xuseen Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 662704 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xudur, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Cumar Yaasiin sida ku cad warqadda Lam. 8726 Tr. 27.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xudur;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lambar 662704 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xudur kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Cumar Yaasiin;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xudur in ay siiso J.le Heybe Xuseen Xersi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wa xishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.8.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 589

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Heybe Xuseen Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 141891 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Xaydoow Faarax sida ku cad warqadda Lam. 8726 Tr. 27.8.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 1aad Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lambar 141891 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Xaydoow Faarax;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa in ay siiso J.le Heybe Xuseen Xersi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan, markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

**Muqdisho, 27.8.1986**

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 590